PENUMBRA

Maraykankeyga

Muxuu yahay Maraykankaaga? Maxaad rajeynaysaa in uu noqdo? Maraykankeyga waa casumaad loogu talogalay dadka deggan Minnesota si loo wadaago sida qof kasta oo innaga mid ah uu u dareemo qarankeenna. Sheekooyin laga helay gobolka oo dhan ayaa lagu soo bandhigi doonaa masraxa waxaana laga tabin doonaa raadiyaha si loo dhiirageliyo dad kale oo badan, oo jacel Maraykanka. Waxaan kugu casuumaynaa in aad sheegtid taariikhdaada-shakhsiyeed ee guud, waxyaabaha adiga gaarka kuu ah, iyo shakhsiyadaada–iyada oo loogu talogalay in lagu sameeyo sawir qurux badan oo kala duwan oo wadankeena ah. Soo gudbinta qoraallada laga helo dad weynaha waxaa looga aqbali doonaa si toos ah internetka waxaana dib-u-eegi doona guddi qorayaal ruwaayad, qorayaal, weriyayaal, iyo fannaaniin u dhaqdhaqaaqa arrimaha fanka. Dadka soo gaara isreebka ugu dambeeya waxay si dhow ugala shaqeyn doonaan fannaaniinteena-meesha-deggan si ay siminaar ugu bixiyaan sheekooyinka inta ay u diyaar garoobayaan in ay caan noqdaan. Penumbra waxay ku wadaagi doontaa sheekooyinkan dhiiragelinta leh barnaamijka lagu magacaabo Let's Talk: Maraykankeyga ee bisha Maarso 2018. Wakhtiga kama dambaysta ah ee aad soo gudbinayso sheekadaada waa 17 Nofeembar, 2017. Dadka gaara isreebka ugu dambeeya waxay sidoo kale heli karaan abaal marin $200 ah marka mashruuca la dhammeeyo.

<u>Xeerarka</u>

Xeerarka Soo gudbinta/U-qalmida

Dadka ka qaybqaadanaya waa in ay ahaadaan dad hadda deggan Minnesota. Dadka kale ee deggan gobollada kale ee dalka waxaa lagu boorinayaa in ay soo gudbiyaan sheekooyinkooda. Maalgelin ayaa la heli karaa si loo bixiyo gaargaar guryeynta iyo safarka lagu imaanayo loogana laabanayo meesha uu siminaarka uu ka dhacayo iyo barnaamijka Let's Talk: Dhacdada Maraykankeyga waxay ka dhacaysaa Saint Paul.

Qoraallada la soo gudbinayo waxaa laga aqbali doonaa dadka da'da yar. Haddii qof da'diisu yar tahay loo doorto in uu noqdo qof soo gaarey isreebka ugu dambeeya, oggolaansho looga qaybqaadanayo siminaarka Maraykankeyga iyo dhacdada tooska ah ayay khasabtahay in laga helo mas'uul sharciyaysan. Dadka soo gaara isreebka ugu dambeeya waxaa khasab ku ah in ay ka soo baxaan xeerarka u qalmitaanka soo socda:

- Dadka soo gaara isreebka ugu dambeeya waxaa khasab ku ah in ay ka qaybgalaan saddex siminaaro-shakhsi ah kuwaas oo ka dhaca Penumbra ama meel kale oo munaasab ah oo ku taalla Saint Paul, MN taariikhahan soo socda:
    - Janaayo 27 – 28, 2018
    - Febraayo 10 – 11, 2018
    - Febraayo 24 – 25, 2018

Dadka soo gaara isreebka ugu dambeeya waa in ay doonayaan in ay la wadaagaan shaqadooda barnaamijka Let's Talk ee ka dhaca Penumbra: Maraykankeyga ee dadka tooska u fadhiya hortooda oona laga duubo dhinaca Wararka MPR. Dhacdadu waxay ka dhici doontaa Penumbra ama meel kale oo munaasab ah ee ku taalla Saint Paul, MN maalinta Isniinta, 12ka Maarso,2018.
* Ka qaybqaatayaasha la doorto waxay fursad u heli karaan in shaqadooda lagu daabaco buug-elektaroonig ah.

<u>Taariikho Muhiim ah</u>

Wicitaan Furan oo loogu talogalay soo Gudbinta

- Isniin, 16ka Oktoobar ilaa Jimcaha, 17ka Nofeembar, 2017
- Wakhtiga kama dambayska ah ee la soo gudbinayo: Jimco, 17ka Nofeembar, 2017 habeen barka

Dadka soo gaara isreebka ugu dambeeya
Laba iyo tobanka qofood ee soo gaara isreebka ugu dambeeya waxaa la soo wargelin doonaa bisha Diseembar waxaana la ogaysiin doonaa bisha Janaayo

Siminaarada
Dadka soo gaara isreebka ugu dambeeya waxaa khasab ku ah in ay ka qaybgalaan saddex siminaaro qof ahaaneed kuwaas oo ka dhacaya Penumbra ama meel kale oo munaasab ah oo ku taalla Saint Paul, MN taariikhahan soo socda:

- Sabti, 27ka Janaayo ilaa Axada, 28ka Janaayo, 2018
- Sabti,10ka Febraayo ilaa Axada, 11ka Febraayo, 2018
- Sabti, 24ka Febraayo ilaa Axada, 25ka Febraayo, 2018

Let's Talk (Kaalay Aynu Wada Hadalno): Dhacdada Maraykankeyga
Asniin, 12ka Maarso, 2018

<u>Soo gudbi Sheekadaada</u>
Soo gudbinta
Soo gudbi ama soo dir hal dokumeenti (Word ama PDF) adiga oo ku sharxaya Maraykankaaga. Qoraalka la soo gudbinayo waa in uusan ka badnaanin shan (5) bog. Qoraallada la soo gudbinayo waxay noqon karaan qaabab badan oo hal-abuur qoraal ah ay ku jirto in qofka uu sheekada asaga-sheego, gabay, hadal qofka keligiisa ah, xusuusooyin, iyo wax kale oo ka badan.
Marka aad wax ka qoraysid Maraykankaaga, waa in aad tixgelisaa qaar ka mid ah su'aalahan soo socda:

- Qofkee ku nool Maraykankaaga?
- Maxaa ka dhacaya Maraykankaaga?
- Maxaad ku aragtaa, ku dareentaa, ku dhadhamisaa, ku urisaa kuna taabataa Maraykankaaga?
- Muxuu yahay mustaqbalka Maraykankaaga? Qofkee ku nool meeshaasi? Maxay sameeyaan? Maxay arkaan?
- Sideen ku tagi karnaa halkaasi bulsho iyo qaran ahaan?
- Ma jirtaa khibrad ama xusuus kugu soo noq-noqota midaas oo ku saabsan waxa uu Maraykanku kuu yahay adiga maanta?

Xiriirka
Wixii ku saabsan su'aalaha khuseeya sida aad uga qaybqaadan kartid dhacdada Maraykankeyga, fadlan kala xiriir:
Shayla Roland
Soosaare Ka qaybqaadanaya
651.288.6785
myamerica@penumbratheatre.org

Wixii ku saabsan su'aalaha warbaahinta, fadlan kala xiriir:
Amy Thomas
Agaasimaha Maamulka
651.288.6780
amy.thomas@penumbratheatre.org

Qoraalka Foomka Loogu Soo Gudbiyo Si Toos ah Internetka iyo Su'aalaha

Foomka Soo Gudbinta ee Maraykankeyga

Waad ku mahadsantahay u soo gudbinta Maraykankeyga! Loogu talogaley foomkan, fadlan gacanta ku hayso labo nuqul oo aad soo gudbinaysid - mid ku qoran magacaaga iyo mid aan magacaaga ku qornayn.

1. Magaca Hore
2. Magaca Dambe
3. Cinwaanka Iimaylka
4. Lambarka Taleefoon
5. Muxuu yahay cinwaanka qoraalkaaga aad u soo gudbinaysid "Maraykankeyga"?
6. Fadlan soo geli qoraalkaaga aad u soo gudbinaysid "Maraykankeyga" (ugu badnaan ah 5-bog). Fadlan isticmaal PDF ama Word.
7. Fadlan soo geli qoraalkaaga aad u soo gudbinaysid "Maraykankeyga" (ugu badnaan ah 5-bog). Nuqulkan, fadlan ka tir-tir magacaaga iyo wax kasta oo macluumaad xiriir ah oo adiga kugu saabsan ah. Fadlan isticmaal PDF ama Word.
8. Da'da
    - Ka yar 17, 18-24, 25-34, 35-44, 45-54, 55-64, 65 – 74, 75 ama ka weyn
9. Koodhka Degaanka
10. In intee la'eg ayaad ku noolayd Minnesota?
    - 0-2 sano, 3-5 sano, 6-10 sano, 11-15 sano, 14 -20 sano, 21 -30 sano, 31 sano ama ka badan
11. Isirka/Qowmiyada: Anigu waxaan ahay...
12. Jinsiga: Anigu waxaan ahay...
13. Dookha Galmo: Anigu waxaan ahay...
14. Caqiido/Diin: Anigu waxaan ahay...
15. Heerka waxbarasho ee ugu sareeya ee aad dhammaysay
    - Dugsi Sare, Kulliyad, Shahaado Sare ee Heer Jaamacadeed. Tababar Xirfadeed/Farsamo, Wax kale
16. Dakhliga qoyska
    - Ka hooseeya $10,000, $10,000-$24,999, $25,000-$49,999, $50,000-$99,999, $100,000-$149,999, $150,000-$199,999, $200,000-$249,999, $250,000+, Wax kale
17. Koj hnov txog My America tau li cas?
18. Waxaan cadeynayaa haddii la ii doorto in aan ka mid noqdo dadka gaara isreebka ugu dambeeya, waxaan awoodi doono in aan ka qaybgalo siminaarada dhammaadka toddobaadka (26-27ka Janaayo, 2018; 10-11ka Febraayo , 2018; 24-25ka Febraayo, 2018) iyo barnaamijka 'Let's Talk' ee 12ka bisha Maarso, 2018 ah: Dhacdada Maraykankeyga.
    - Haa
    - Maya
19. Aniga waan oggahay in aan awoodi doonin in aan ka qaybqaato siminaarada. Si kastaba, haddii la i doorto waxaan jeclahay in qoraalka aan soo gudbinayo lagu daro qoraallada la daabacayo – kuwaas oo tooska internetka ama buug daabacan ah.
    - Haa
    - Maya
20. Halkan waxaan oggolaansho ugu siinayaa Shirkadda Masraxa Penumbra in ay isticmaasho macluumaadka lagu aruuriyay foomkan.
    - Haa
    - Maya

21. Halkan waxaan oggolaansho ugu siinayaa Shirkadda Masraxa Penumbra in ay u isticmaasho qoraalkayga aan soo gudbinayo, asaga oo dhan ama qayb ka mid ah, daabacaad faafin iyo/ama ujeeddooyin kale.
    - Haa
    - Maya

Waad mahadsantahay! Qoraalkaaga aad soo gudbisay waa la helay.